DOODAHA DOORASHOOYINKA EE BRC, MADASHA 1AAD

“Mudnaansiinta Tayada iyo Hufnaanta Doorashooyinka Soomaaliya ee 2021”

|Doodaha Doorashooyinka |Madasha 1aad |Luulyo 23, 2021

ARAR

Sida aan wada ognahay nidaamka siyaasadeed ee dalka Soomaaliya wuxuu soo maray marxalado kala duwan, burburkii kadib rajada keliya ee dadka Soomaaliyeed ay isha ku hayn jireen dhanka siyaasadda waxay ahayd in xukunka si nabad ah lagula kala wareegayay. Walow ay jireen caqabado kala duwan oo ku weygaaran nidaamka siyaasadeed ee Soomaaliya ee jilicsan, haddana arrintaasi waa arrin mudan joogtayn iyo dhammaystir.

Soomaaliya 4tii sanoba waxaa loo dareeraa doorashooyin, walow siyaabo kala duwan ay u dhacaysay kolka sooyaal ahaan la milicsado, haddana waxay ka siman yihiin in la doorto golayaal shacab iyo madaxweynaha. Haddaba, sida loo madlan yahay 2021ka Soomaaliya waxaa ka dhacaysa doorasho, sidaa darteed iyada oo laga duulayo arrintaas, ayaa **Xarunta Cilmibaarista Bayaan** oo ah xarun bulsheed, oo aan faa'iido doon ahayn, isla markaana abuuraysa deegaan aqooneed togan, kuna qotoma dadka iyo aragtiyaha, iyada oo loo marayo

abuurista baraarug, diyaarinta hoggaamiyayaal, iyo dhisidda bulshada, waxa ay bilowday qabanqaabinta iyo qabashada doodo ay ugu magac dartay [**Doodaha Doorashooyinka**], kulankaanina waa madashii 1aad ee doodahaas lagu furayay.

Doodda waxaa daadihina isla markaana qaybinayay hadalka; **Aadan Badiic** oo ah Agaasimaha –**BRC**- ee Xafiiska Soomaaliya. Halka martida dooddu ay ahaayeen:-

1. **Musharrax Xildhibaan JFS 2021-2025: Cabdulcasiis Nuur Caabi – Galmudug**
2. **Musharrax Xildhibaan JFS 2021-2025: Maxamed Mahdi Khaalid - Puntland**

Dooddo oo uu furfuray Aadan, ayaa waxa ay ku bilaabatay xog ku saabsan Xarunta Bayaan, iyo soobandhigidda yoolka ay ka leedahay doodahaan; oo lagusoo koobi karo:-

- **In laga shaqeeyo sidii loo heli lahaa ama loosoo saari lahaa xildhibaan tayo leh oo si dhab ah u metela dadka doortay iyo deegaankiisaba.**
- **In bulshada guud ahaan, iyo gaar ahaan cidda masuuliyadda gaarka ah qaadday lagu baraarujiyo masuuliyadda ka saaran in ay qabsoonto doorasho xor iyo xalaal ah oo daahfuran.**

Intaas kadibna, dooddo waxa ay u wareegtay 2da musharrax, iyaga oo ka jawaabaya weydiimaha soo socda:

- **Su’aasha 1aad: Mudane musharrax maxay ka dhigan tahay musharraxnimadaadu? Maxaad se kaga duwanaan kartaa golayaashii shacabka ee DFS ee kaa horreeyay?**

Labada musharrax ayaa faahfaahin dheeriya ka bixiyay ujeedkooda musharraxnimo iyo sababta ku kalliftay in ay isasoo sharraxeen. Dhanka kalena, waxay hoosta ka xarriiqeen in loo baahan yahay maanta xildhibaan fahansan waajibaadyada saaran iyo shaqooyinka sugaya oo ay ugu muhiimsan yihiin; a) In uu si dhab ah u metelo bulshadii soo dooratay, b) La xisaabtanka xukuumadda, c) Wax kusoo kordhinta dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka. Ugu danbaynna waxaa kasoo dhex baxday doodda iyo falanqaynta musharrixiintu in soobixidda xildhibaan tayo leh ay tahay helitaanka dowladnimo wanaagsan, oo ku dhisan mabaadi’da islaxisaabtanka, caddaaladda iyo sarraynta sharciga.

- **Su’aasha 2aad: in ay dhacdo doorasho daahfuran, xor iyo xalaal ah, ka maran laaluush maxay yihiin arrimaha dhiirrigelin kara? Maxay se yihiin caqabadaha ku hor-gadaaman?**

Falanqayn dheer oo ay ku sameeyeen musharrixiintu weydiintaas, waxay isla qeexeen arrimaha soo socda:

1. In ay dhacdo doorasho daahfuran, xor iyo xalaal ah waxay ku xiran tahay dhammaan bulshada, waxayna ku leeyihiin saamayn.

2. Qofka ergayga ah waa in uusan codkiisa iibsan, waayo naftiisa ma metelo e waxa uu metelaa kumannaan qof oo qaybtood nasiib u yeelan waayay in ay goobtaas soo gaaraan.
3. Guddiga doorashada ee laysku raacay ayaa masuuliyadda koowaad qaadi doona ee qabsoomidda doorasho xor iyo xalaal ah.
4. Waxaa caqabad weyn ku noqon karta in ay dhacdo doorasho hufan iyada oo waqtigii loo asteeyay ay ka dib dhacdo doorashadu.
5. Dalal shisheeye oo ka faa'iidaysta tabardarrida dowladnimadeenna ayaa caqabad kale ku noqda hufnaanta doorashada.

- **Su'aasha 3aad: Helitaanka xildhibaanno tayo leh, waxay ka dhigan tahay dhicitaanka doorasho hufan oo daahfuran haddaba Sidee ayaa lagu helikaraa xildhibaan tayo leh? Yaa se ka qayb qaadan kara soo saarista xildhibaan tayo leh?**

Musharrixiinta oo si qotadheer u lafa-guray weydiintaas waxay hoosta ka xarriiqqeen in bulsho wacyi leh ay masuul ka tahay in ay soo xulaan ergay tayo leh, ergaygaasina waxa uu soo saarayaa xildhibaan si dhab ah bulshada u metela, kaas oo dooran doona Madaxweyne mudan in uu hoggaamiyo dadkeenna oo tayo leh.

Dhanka kale waxay ku doodeen in qofka lagu doorto aqoontiisa, tayadiisa iyo xiriirka ka dhaxeeya isaga iyo Alle iyo isaga iyo bulshada. Dhanka kale, waxa ay isku raaceen in ay lagama maarmaan tahay in la helo halbeeg bulsho oo lagu kala saarayo cidda tayada dhabta ah leh iyo sheegatada.

GUNAANAD

Dooddu waxa ay kusoo idlaatay talo bixin iyo dardaaran. Waxaana diiradda lagu saaray gunaanadka doodda awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, iyada oo la tilmaamay awoodaha uu leeyahay goluhu iyo waajibaadyada saaran, haddaba. Si gaar ah, labada musharrax ayaa waxka taataabtay haddii ay ku guulaystaan xilkaas arrimaha hortebinta u leh ee ay wax ka qabashadooda diiradda saaridoonaan.

Ugu danbaynna, Aadan Badiic oo kulanka daadihinayay ayaa uga mahadceliyay dhammaan dhegeystayaashii iyo kasoo qayb galayaashii doodda oo ay ugu horreeyeen musharrixiintii martida ku ahayd Madashii 1aad ee Doodaha Doorashooyinka ee BRC.

Haddaba doodda oo faahfaahsan oo dhammaystiran lifaaqa hoose ka dhegayso:

https://www.facebook.com/BRC.Center/videos/246357587093397